



**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka**

**Hadal-qoraalka kalfadhiga 8-aad
Documentiga Kalfadhiga 8-aad**

Kalfadhiga 8-aad

Tr:23.04.2016

Kulankiisa: 1-aad, Saac. Fur.12:00gh, Saac.Xir..12:53 gd.

Guntinta: 145 Xildhibaan

Ajendaha:-

- 1) Furitaanka Aayadaha Qur'aanka kariimka**
- 2) Ansixinta Ajendaha**
- 3) hadal-jeedinta Guddoomiyaha oo ku abbaran xallinta arrimaha mooshinka**
- 4) akhrinta 1-aad Hindise-sharciyeedka ka hortaga walxaha Qarxa**
- 5) akhrinta 1-aad ee Hindise-sharciyeedka argagixisada “ku wargalin la tashi maamulada Gobolada”**
- 6) dooda hindise-sharciyeedka lagu dhisaayo Axaabta Siyaasadda**

1.Shir-Guddoomiye,Guddoomiyaha ku.xigeenka 2-aad Golaha Shacabka JFS Mudane Mahad Cabdalla Cawad,

Waxaa shirka furay Guddoomiye K/X.2-aad JFS Mudane Mahad Cabdalla Cawad.waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka uuna akhriyay Xildh. Sheekh Shaacir.

2.Guddoomiyaha wuxuu sheegay in maanta Golaha uu horyaalo Ajende ka kooban 6 Ajende, waa hadljeedinta Guddoomiyaha oo ku a, wuxuuna ka codsaday in ay ansixiyaan Xildhbaanadana wey ansixiyeen,

Kadib Guddoomiyaha wuxuu akhriyay hadal-jeedinta xallinta qillaafaadka Mooshinka hishiiska ku saabsan xalinta khillaafaadka & tabashooyinka ka jira Bulshooyinka Dhaqameed ee Gobollada Hiiraan iyo shabeelada dhexe.

Guddoomaha Baarlamaanka JFS markuu arkay mooshinka ku taariikhsan 11/042016 ee soo gudbiyeen 42xildh. Golaha Shacabka :“in la joojiyo dhisidda maamul=goboleedka Hiiraan iyo shabeelada dhexe. Si muwaadiniinta labadaas gobol ay isugu diyaariyaa.”

Markuu arkay, Guddoonka warqadda xukuumadda ay kaga codsatay kuna taariikhsaney 19/04/2016 ay Guddoonka kaga codsatay in mooshinka la hakiyo oo lala sugu warbixinta Wasiirka Arimaha Guddaha iyo Federaalka.

In xildhibaanada iyo Xukuumadda isla ogolyihiin in xal loo raadiyo qilaafaadka iyo Tabashooyinka Bulsho dhaqameedka labada gobol.

In qodobka 61-aad ee Dastuurka xeerinaayo in xildhlibaanada ay xilsaaran yihiin jirista iyo joogteynta danta guud ee Qaranka iyo in xil gaar ah ka saran yahay daryeelidda danaha deegaan doorashooyinka ay kasoo jeedaan.

Intaa kadib, Guddoomiyaha wuxuu soo saaray ilaa shan qodob oo lagu xalinaayo qilaafaadka mooshinka.

Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Wasiira Dowlaha AMniga Mudane C/naasir

Wasiirku wuxuu akhriyay Hindise-sharciyeedka ka hortaga walxaha qarxa isagoo si faahfaahsan kaga muhiimadda ay u leedahay y ummadda Soomaaliyeed uuna kusoo koobay illaa 4 qodob.

Guddoomiyaha wuxuu u yeeray Guddoomiye K/xigeenka ARimaha Guddaha si uu akhriyo Akhrinta 2-aad ee Hindise-sharciyeedka ladagaalanka Argigixisada .

Guddoomiye k/xigeenka Guddiga Mudane Daahir AMiin Jeerow wuxuu akhriyay warbixinta Guddiga Arimaha Gudaha ee Hindise-sharciyeedka ladagaalka Argigixisada wuxuuna sheegay sharcigaan in aad aad uu muhiim un yahay uuna ka kooban yahay 37 qodob wuxuuna sharcigaan u baahan yahay :

- 1) in wada-tashi rasmi ah la sameeyo
- 2) in lala kaashado looyaro caali ah iyo kuwa soomaaliyeed
- 3) in culumada loo bandhigo sharcigaan qodobadiisa ka kooban 37da
- 4) in loo diro maamulada Gobolada dalka iyo DG Ku MG
- 5) in isbadal lagu sameeyo magaca sharciga oo xaasiyad badan leh
- 6) in la helo cid naga caawiso qodobada shanta ah ee kor ku xusan

guddoomiyaha wuxuu sheegay in sharcigaan uu yahay mid xasaasi ah maamul Guboleedyahana lala yeesho wada tashi ku saabsan arrimaha sharcigaan.

Waxaa lagalidoonaa dooda sharciga axsaabta siyaasadda kaasoo hindise-sharciyeedkaas uu ka bilaabmay Baarlamaanka gudihiiisa uuna ka dhashay, haddii la dhameystiriwaayo ee nagu noqoneyso mid aan hagaagsaneyn, kadib, Guddoomiyaha wuxuu soo jeediyay in la qoro Dooda Hindise-sharciyeedka Xildhibaanadii ka qeyb-qaadan lahaa. Kadib, waxaa la akhriyay Xildhibaanadii dooda isu qoray inta dhimana gadaal looga dari doono maalinta isniinta soo socoto.

Kalfadhiga 8aad kulankiisa 3-aad ee shir-guddoomiinaayay Guddoomiye K.Xi2-aad ee Golaha Mudane Mahad Cabdala Cawad, wuxuuna sheegay inuu shirka xiran saacadda markey eheyd 12”53gd.